

Waxbarashada Raashinka

Madoonaysaa in aad kala baratid cuntooyinka swiidhiska iyo cuntooyinka dalalka kale?

Madoonaysaa in aad shaqaysid kadib marka aad waxbarashada dugsiga sare aad dhameysid?

Madoonaysaa in aad shaqeysid ama aad waxbarasho dibada aad u tagtid?

Madoonaysaa in aad shirkado aad lahaatid mustaqbalka?

Madoonaysaa in aad heshid waxbarashooyin wanaagsan oo kuu sahla sidii aad shaqooyin aad ku helilaheyd?

Sidaas daraadeed waxbarashadan raashinka ama cuntada waa mid adiga kugu haboon.

Waxbarashadan cuntada waxaad lahaandoontaa aqoon aad u balaadhan oo ah sifayn iyo muujin iyo welib maareyn xaga cuntada ah. Waxaad kaloo laakin aad doorankartaa oo aad ku wanaagsanaankartaa waxbarashadeeda, haddii ay jirto wax aad adigu gaar ahaan aad, aad u xiiseyneysid. Waxaad bal yar ogaataa, habka cuntooyinka loo habeeyo, iyo marka aynu xafladaha lasameysanayo, sida tusaale ahaan marka qof uu sanda buuxsanayo, iyo inta nooc ee raashin kaladuwna ee jira ama aynu helikarno! Waxaad halkaas aad ka garankartaa sida suuqa raashinku uu u balaadhan yahay, iyo fursadaha badan ee jira.

Ganacsiga raashinka ama cuntadu waxa uu u badan yahay shirkado, ku waas oo ay leeyihiin shaqsiyaad iyo dad kalagedisan. Siidaas daraadeed waxaad barandoontaa aasaaska ah sidii shirkad aad adigu aad leedahay aad u furan laheyd mustaqbalka.

Suuqa raashinku sidiisba waa caalami, isla markaana ku xidhan isfahan iyo adigoo yaqaana luqado kale, una haya xiiso dadka kale iyo dhaqamadooda. Waxaa intaas soo raaca in aad helikartid fursad ah in aad shaqeysid ama aad waxbarasho aad utagtid dibada, kadib marka aad waxbarashadan raashinka aad dhameysid.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan cuntada, shaqo toos ah ayaad raad sankartaa kadib marka dugsiga sare aad dhameysid. Shaqooyinka aad raad sankartid waxa ay ku xidhantahay hadba wax aad baratay, takhasusna kuu ah, markii aad ku jirtay dugsigasare. Waxaa inta badandhacda in aad tababar xirfadeed aad sameyndoontid, kaas oo noqonkara mudo sanad ama in kabadan. Waxa lagusiin doonaa ama aad qaadan doontaa lacagta tababarka laqaato, waxaana lasocondoontaa ama ku hogaamindoona qof ka shaqeeya qeybahaas aad adigu waxbarashada ugu jirtid. Halkaas oo aad ka faaideysandoontaa waxna aad ka baran doontaa dadka aad la shaqeendoontid.

Dadkaasi waxa ey leeyihiin khibrado aad ubadan, Islamarkaana kana soo sheqeeyey mudo aad u farabadan qeeybtaas aad wax barashada aad ugu jirtid.

Haddii aad dooneysid waad siiwadan kareysaa waxbarashadaada kadib marka aad dhameysatid waxbarashadaada dugsiga sare ilaa iyo heer jaamacadeed.

Waxbarashadani waxa ay ka koobantahay

Waxabarashadan cuntada wax ay ka koobantahay casharo, Casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo u gaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada Raashinka oo kaliya. Waxaa intaas sooraaca in ay jiraan casharo kale oo aad adigu gooni aad u doorankartid.

Waxbarashadani malaha takhasus guud oo kasiman dhamaan iskuulada oo dhan. laakinse waax jirikara in iskuul kasta uu waxbarashadan uu u madaxnabanaanyay sidii uu u sameysan lahaa takhasus u gooni ah oo waxbarashadan ah. Waxbarashooyinka takhasuska waxaa ka mid noqonkara sida, mac-macaanleh, iibiye raashinka freeshka ah, makhaayadaha shaaha lagacabo, suuqa hilibka iyo kaluunka, iyo in aad noqotid hilible.

Waxaa suurtoagal ah meesha aad degentahay in aad ka heshid waxbarashobadan oo takhasus ah, kuwaas oo adiga kugu haboon. Waxaad weydiinkareysaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yrkesvägledare)

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada Raashinka waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada, Waxaad kaloo aad heysataa ugu yaraan ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeysa iskuulkaaga iyo shirkadaha iyo goobaha shaqooyinka ee u dhaw meesha aad degen tahay. Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid. xidhiidhkaas oo aad markale aad kagafaa-ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.

Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen iSwiidhen, way suurtoagal noqon kartaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaajira shaqooyin badan oo laga shaqeynkaro cuntada ama raashinka. Run ahaantii waa wax aad u fiican haddii aad shaqo raadsatid kadib marka aad dhameysatid waxbarashadaada dugsiga sare. Haddii ay noqoto in aad shaqo heshid, waxa markaa sabab u ah shaqadaas aad heshay waxbarashada ama casharada aad qaadatay, iyo inta tiri ee tababar xirfadeed aad soo sameysay, iyo khibrada shaqo ee aad leedahay. Waxa intaas u sii dheeraan kara adigoo diyaar u ah in aad u safartid meelkasta oo aad shaqo aad ka helikareysid.

Shaqooyinka intabadan la helo waxaa u badan mac-macaanleh.